

Aqoonsiga SANTRAX	Aqoonsiga Macmiilka
-------------------	---------------------

Samaynta Khadka Moobeelka ee Sandata (SMC)

Marka ugu horeysa ee aad bilaabayso codsiga, waxa laga yaabaa in aad hesho shaashad soo booda oo ku waydiisanaya ogolaanshaha isticmaalka goobtaada hada.

Dooro mid ka mid ah ““Only While Using the App” ama “Always.” Waxaan kugula talineynaa inaad ku xiriiriso Wi-Fi (haddii la heli karo) markaad ku samaynayso barnaamijka abka si macluumaadkaagu u kaydiyo.

Fadlan ogaw: Dhammaan isticmaalka barnaamijka abka mustaqbalka waxa la samayn karaa Wi-Fi la'aan.

1. Gali lambarka adeeg bixiyaha wakaalada iLIFE: 2-91496 gali qeybta Aqoonsiga Shirkada.

2. Geli magaca lagu isticmaalo.

Kani waa ciwaanka iimaylkaaga oo aad kusoo gudbisay iLIFE markii aad isu-diiwaangalinaysay adeegyada EVV.

3. Geli lambarka sirta ah.

Lambarka sirta ah ee ku meel gaarka ah waa isla erayga sirta ah ee laga helay Sandata ee iimaylka lagu soo diray.

Fariin ayaa kuusoo muuqan doontaa si aad u doorato su'aalaha amniga iyo jawaabaha haddii ay dhacdo inaad lumiso eraygaaga sirta ah oo aad u baahan tahay inaad dib u dejiso.

4. Dooro su'aalaha amniga ee aad rabto oo geli jawaabaha.

Kadib markaad ka jawaabto su'aalaha amniga, shaashada ay ku qoran tahay fariinta ku xigta ayaa ku weydiin doonta inaad samaysato lambarka sirta ah ee cusub.

5. Geli lambarka sirta ah sanduuqa oo xaqiiji erayga sirta ah adiga oo mar kale gelinaya hoosta.

Lambarka sirta ah waa in uu ahaadaa laba iyo toban xaraf waana in uu ku jiraa hal xaraf oo far waaweyn ah, hal xaraf oo far yaryar ah, hal lambar, iyo hal calaamad oo gaar ah*.


- *Tusaale ahaan: calaamada la yaabka (!), calaamada (@), calaamada pound ka (#), calaamad doolarka (\$), ampersand (&), xidigta (*), ama xariiqinta hoose (_).

6. Ku gal adigoo isticmaalaya lambarka sirta ah ee cusub.

Adeegsiga

Marka xigta waxaan dib u eegi doonaa fursadaha aad ku arki doonto iyada oo loo adeegsanayo liistada adeegsiga.

- Si aad u bilowdo, ku dhufo astaanta liistada si aad u balaariso liistada.
- Kadib waxaad arkaysaa: Booqashooyinka, Macaamiisha, Setinka, iyo Caawinta.
- Booqashooyinka waxay muujinaysaa booqashooyinka todobadii maalmood ee hore iyo adeegyada la bixiyay.
- Macaamiishu waxay kuu ogolaanayaan inaad raadiso macaamiisha adoo isticmaalaya lambarkooda Aqoonsiga Sandata.
- Sitinka wuxuu kuu oggolaanayaa inaad bedesho luuqada aad doorbidayso iyo lambarka sirta ah.
- Caawinta waxay u furi doontaa hagaha caawinta Sandata Mobile Connect.
- Intaa waxaa dheer, waxaad riixi kartaa calaamada ka Bixintaanka si aad uga baxdo.



Bilaabashada Booqasho

Hadda waxaan eegi doonaa habraaca loo bilaabo booqasho cusub.

1. Gal Sandata Mobile Connect.

2. Balaari liistada oo taabo Macaamiisha.




3. Geli Aqoonsiga Macmiilka ee Sandata godka oo riix Raadi Macmiilka.

Haddii aan natiijooyin la helin, marka hore laba jeer hubi inaad haysatid lambarka aqoonsiga oo sax ah ka dibna isku day inaad mar kale geliso.

Haddii raadintaadu lagu guulaysto, magaca macmiilka, ciwaanka deegaanka, iyo lambarka aqoonsiga ayaa ka muuqan doona shaashadda.

4. Taabo badhanka Bilaw Booqasho.

Haddii shaqaaluhu aanu a aqoonin Aqoonsiga Macmiilka, ama uu leeyahay arin kale oo aanay awoodin inay doortaan Bilaw Booqasho, taabo badhanka Booqashada aan la garanayn. Sharaxaad faahfaahsan oo ku saabsan Booqashooyinka aan la Aqoon ayaa lagu sheegay gadaasha hagahan.



5. Dooro adeega la bixinayo maalintaas oo riix START VISIT.


Koodhka adeega aad ka dooran karto waxay ku xirnaan doonaan barnaamijkaaga iyo baahida macmiilkaaga. Sawirka dhanka midig waa guudmar degdeg ah oo ku saabsan koodhka adeega EVV.

Fadlan ogaw:

- Adeegga COMBO (Combo- PCS & SHC) ayaa kaliya diyaar u ah Janaayo 1deeda, 2021 kadib, barnaamijka IRIS, iyo kaliya haddii labada adeegba la bixiyo isku mar isla macmiil isku mid ah.
- Adeegga COMBO looma heli karo barnaamijyada Daryeelka Qoyska.
- T1020 ma khusaysa barnaamijka IRIS.

Marka xigta, shaashad ayaa kuusoo bixi doonta oo ku weydiinaysa inaad xaqiijiso wakhtiga imaanshaha saxda ah iyo adeega kahor intaan bilaabin.

Liiska Adeega	
Koodhka Adeega	Doorashada Muujinta Moobeelka ee Liistada Hoos u dhaadhadca
T1019	Daryeelka Shakhsi ahaaneed Svc/15 daqiiqo
T1020	Daryeelka Shakhsi ahaaneed/Maalin
S5125	Daryeelka Guriga ee Taageerada ah/15 daqiiqo
S5126	Daryeelka Guriga ee Taageerada ah/Maalin
COMBO	COMBO—PCS & SHC



6. Dooro goobta adeega (Guriga ama Bulshada)


Fiiro Gaar ah: Midan waxaa loogu talagalay ujeedo macluumaad ahaaneed oo kaliya. Ma jiro wax xadidaad ah oo goobta adeega ah sababaha EVV ee IRIS ama barnaamijyada Daryeelka Qoyska.



7. Xaqiiji in macluumaadku sax yahay oo taabo badhanka YES.

8. Kadib marka tallaabooyinka hore la dhameeyo, ka bax abka adigoo isticmaalaya liistada ku taala geeska bidix ee sare oo dooro "Sign Out."

Ujeedooyinka amniga awgeed, haddii aadan si toos ah uga bixin waxa lagu saarayaa shan daqiiqo kadib oo aadan isticmaalaynin.



Dhamaystirka Booqasho

Hadda waxaan eegi doonaa habraaca loo buuxiyo booqasho.

1. Gal Sandata Mobile Connect.

2. Balaari liistada oo taabo Booqashooyinka.

3. Tap on the Visit In Progress.

“Booqashada Socda” waxay usoo muuqan doonaan laba ikhtiyaar si loo dhamaystiro booqashada. Doorashada labaad waa astaanta baajinta ku taal geeska midig ee sare, kaas oo baajin doonta booqashada.

Fadlan ogaw: Taabashada astaanta baajinta booqasho waa in la isticmaalo oo kaliya haddii shaqaaluhu illoobaan inuu dhamaystiro booqashada wakhtiga saxda ah.

Haddii aad doorato inaad baajiso booqashada adigoo taabanaya astaanta baajinta, hubi inaad qorto taariikhda, wakhtiga, iyo adeegyada loo qabtay booqashada si aad u ogaysiiyo iLIFE booqashada in la baajiyay oo loo baahan doonaa sixitaan.

4. Taabo badhanka Dhamaystir Booqashada si aad u dhamaystirto booqashada.

5. Dooro goobta adeega (Guriga ama Bulshada)

Fiiro Gaar ah: Midan waxaa loogu talagalay ujeedo macluumaad ahaaneed oo kaliya. Ma jiro wax xadidaad ah oo goobta adeega ah sababaha EVV ee IRIS ama barnaamijyada Daryeelka Qoyska.

6. Ka bood ku daritaanka hawlaha sababtoo ah midan loogama baahna IRIS iyo barnaamijyada Daryeelka Qoyska.





Ikhtiyaari: Waxaad awood u leedahay inaad qorto qoraal booqasho, in kasta oo aan loo baahnayn. Si aad sidaas u samayso, taabo Fariinta Booqashada si aad uga tagto qoraal ku saabsan booqashada maalintaas. Qoraalku wuxuu ka muuqan doonaa Soo koobitaanka Booqashada.

Fadlan ogaw: Waa inaad kusoo wargalisoa wixii walaac caafimaad ah xiriirada ku haboon. Qaybta fariimaha qoraalka ah maaha badelka soo wargalinta macluumaadka degdegga ah.

7. Ugu dambeyntii, waxaad u baahan doontaa inaad xaqiijiso macluumaadka Booqashada oo kooban kadibna riix badhanka Xaqiiji.

Xaqiijinta Macmiilka

Ka bood xaqiijinta macmiilka sababtoo ah midan loogama baahna IRIS iyo barnaamijyada Daryeelka Qoyska.



Bilaabashada Booqasho Aan la Aqoon

Marka xigta waxaanu eegi doonaa talaabooyinka aad u baahan tahay inaad qaado si aad u soo gudbiso booqasho aan la aqoon.

Booqashada aan la aqoon ayaa la dooran karaa haddii mid ka mid ah waxyaabaha soo socda ay jiraan:

- Shaqaaluhu ma yaqaan Aqoonsiga Macmiilka.
- U-qalmitaanka Medicaid ee macmiilku kuma jiro faylka.
- Sandata ma helin ogolaanshaha ku haboon.
- Haddii shaqaaluhu aanu heli karin Wi-fi ama adeegga qeybta.

Haddii mid kamid ah waxyaabahaan jiraan, qaado talaabooyinka soo socda:

1. Gal Sandata Mobile Connect.

2. Taabo Bilaw Booqasho aan La Aqoonin.

3. Geli magaca koobaad iyo magaca u dambeeya ee macmiilka.

Fadlan ogaw: Macluumaadkan ayaa loo baahan yahay si horay loogu sii socdo. Lambarka aqoonsiga Medicaid waxaa la geli karaa haddii la garanayo, laakiin looma baahna.

4. Marka xigta, taabo Bilaw Booqasho.

5. Ka dooro adeega la bixinayo liiska hoos u dhaadhacda oo tabo Bilow Booqasho.

Shaashad ayaa kuusoo bixi doonta oo ku weydiinaysa inaad xaqiijiso wakhtiga imaanshaha saxda ah iyo adeega inay saxan yihiin kahor intaadan bilaabin.

6. Dooro goobta adeega (Guriga ama Bulshada)Fiiro Gaar ah: Midan waxaa loogu talagalay ujeedo macluumaad ahaaneed oo kaliya. Ma jiro wax xadidaad ah oo goobta adeega ah sababaha EVV ee IRIS ama barnaamijyada Daryeelka Qoyska.




7. Xaqiiji in macluumaadku sax yahay oo taabo badhanka YES.

8. Ka bax barnaamijka abka adigoo isticmaalaya liiska ku taala geeska bidix ee sare oo dooro "Sign Out."

Ujeedooyinka amniga awgood, haddii aadan si toos ah uga bixin, waxa lagaa saarayaa shan daqiiqo kadib oo aadan isticmaalaynin.

Fadlan tixraac qaybta hore si aad u hesho macluumaadka ku saabsan sida loo dhamaystiro booqashada.

Fadlan ogaw: Bilaabida SMC ee qaabka ka maqnaanshaha waxay raaci doontaa tallaabooyinka la mid ah sida bilawga booqasho aan la garanayn. Waxaad ku arki doontaa boodh cawlan oo ku yaal xaga sare ee shaashadda marka aad ku jirto qaabka ka maqnaanshaha.



Bilaabashada Booqasho Koox ahaaneed

Hadda waxaan eegi doonaa habraaca loo bilaabo booqasho koox ahaaneed oo cusub.

1. Gal Sandata Mobile Connect.

2. Geli Aqoonsiga Macmiilka ee Sandata godka oo taabo Raadi Macmiilka.

3. Xaqiiji in macluumaadka macmiilka saxan yihiin oo taabo Bilaw Booqasho Koox ahaaneed.

Haddii macmiilka aan la helin ama haddii aqoonsiga macmiilka aan la garanayn, taabo Bilow Booqashada Aan La Aqoonin geli magaca koowaad iyo magaca u dambeeya ee macmiilka.

Fadlan ogaw: Macluumaadkan ayaa loo baahan yahay si horay loogu sii socdo. TLambarka aqoonsiga Medicaid waxaa la gelin karaa haddii la garanayo, laakiin looma baahna.

4. Taabo Bilaw Booqasho Koox ahaaneed.

5. Ka dooro adeega la bixinayo liiska hoos u dhaadhacda.

6. Dooro goobta adeega (Guriga ama Bulshada)

Fiiro Gaar ah: Midan waxaa loogu talagalay ujeedo macluumaad ahaaneed oo kaliya. Ma jiro wax xadidaad ah oo goobta adeega ah sababaha EVV ee IRIS ama barnaamijyada Daryeelka Qoyska.





7. Xaqiiji in macluumaadku sax yahay oo taabo badhanka YES.

Koodh ayaa ka soo muuqan doona dusha sare ee shaashadda oo tilmaamaysa in kulanka yahay booqasho kooxeed.

8. Si aad ugu darto macaamiil badan, taabo Ku dar macmiilka si aad u geliso macluumaadkooda oo ku celi tillaabooyinka 5-7 macmiil kasta oo dheeraad ah sida loogu baahdo.

9. Kadib marka tallaabooyinka hore la dhameeyo, ka bax abka adigoo isticmaalaya liistada ku taala geeska bidix ee sare oo dooro "Sign Out."

Ujeedooyinka amniga awgeed, haddii aadan si toos ah uga bixin, waxaa lagu saarayaa shan daqiiqo kadib oo aadan isticmaalaynin.



Dhamaystirka Booqashooyin Koox ahaaneed

Waxaa jira dhowr hab oo lagu dhammaystiro booqasho kooxeed. Shaqaaluhu wuxuu u dhamaystiri karaa booqashada hal shakhsi markiiba ama dhammaan isku mar.

1. Gal Sandata Mobile Connect.

2. Taabo Booqashooyinka liiska ku yaal dhanka bidix ee sare ee shaashadda.

3. Taabo booqashada socota.

Dhameystir dhammaan booqashooyin Kooxeedka hal mar

1. Si loo dhamaystiro dhammaan booqashooyinka kooxda hal mar, taabo Buuxi Booqashada Kooxda.

Marka xigta waxaa lagu weydiin doonaa inaad xaqiijiso in dhammaan macaamiishu ay dhammeeyeen booqashadooda isku mar.

2. Dooro goobta adeega (Guriga ama Bulshada)




Fiiro Gaar ah: Midan waxaa loogu talagalay ujeedo macluumaad ahaaneed oo kaliya. Ma jiro wax xadidaad ah oo goobta adeega ah sababaha EVV ee IRIS ama barnaamijyada Daryeelka Qoyska.

3. Waxaad kadib taaban kartaa Xaqiiji shakhsiyaadkaas oo ka gudub hawlaha ku darista sababtoo ah tan looma baahna IRIS iyo barnaamijyada Daryeelka Qoyska.

Booqashadan hada waa la dhameeyay. Waad ka bixi kartaa oo aad xiri kartaa barnaamijka abka.

4. Kadib marka tallaabooyinka hore la dhameeyo, ka bax abka adigoo isticmaalaya liistada ku taala geeska bidix ee sare oo dooro "Sign Out."

Ujeedooyinka amniga awgeed, haddii aadan si toos ah uga bixin, waxaa lagu saarayaa shan daqiiqo kadib oo aadan isticmaalaynin.



Dhamaystirka Booqashooyin Shakhsi ahaaneed

1. Si aad u dhammaystirto booqashooyin kooxeed gaar ah, taabo badhanka Booqashada Dib u Bilaabida ee macmiilka soo dhameystay booqashadooda.

2. Dooro goobta adeega (Guriga ama Bulshada)



Fiiro Gaar ah: Midan waxaa loogu talagalay ujeedo macluumaad ahaaneed oo kaliya. Ma jiro wax xadidaad ah oo goobta adeega ah sababaha EVV ee IRIS ama barnaamijyada Daryeelka Qoyska.

3. Waxaad kadib taaban kartaa Xaqiiji shakhsiyaadkaas oo ka gudub hawlaha ku darista sababtoo ah midan u baahna IRIS iyo barnaamijyada Daryeelka Qoyska.

Booqashadu hadda wuu dhameeyay macmiilkaas, hawshana waxa lagu celin karaa macmiilka kale marka booqashadu dhammaato.

4. Kadib marka booqashad hore ee macmiilka la dhameeyo, ka bax abka adigoo isticmaalaya liistada ku taala geska bidix ee sare oo dooro "Sign Out."

Ujeedooyinka amniga awgeed, haddii aadan si toos ah uga bixin, waxaa lagu saarayaa 5 daqiiqo kadib oo aadan isticmaalaynin.



Macluumaadka Adeega Macmiilka

IRIS

Talefoonka: 888-800-5599
limaylka: IRIS.EVV@iLIFE.org

Family Care

Talefoonka: 888-490-3966
limaylka: FC.EVV@iLIFE.org

Macluumaadka iyo Agabka Tababarka iLIFE EVV
<https://ilife.org/evv/evv-information-and-training/>